

### **Guddoomaha sharafta lahow,**

Waxaan kuula soo xiriiraynaa, in aad hadda ama horay u isticmaashay adeegga soo celinta xiriirka qoysaska ee Laanqayrta Cas ee Finland.

Laanqayrta Cas oo adeegsanaysa adeegga ayaa in ay midoobaan ka caawisa xubnaha qoysaska, kuwaas oo dagaal, masiibo dabiici ah ama dhaqdhaqaaq guuritaan dartiis ku kala go'ay.

### **Maxaa dhacay?**

Kaydka macluumaadka elektroonigga ah ee guddiga caalamiga ah ee Laanqayrta Cas (ICRC) ayaa la jabsaday. Jabsashada kaydka macluumaadka darteed ayeey qolo aan shaqo ku lahayn Laanqayrta Cas gacanta ku dhigtay qalabyada kambuyuurada iyo nidaamyada loo isticmaallo dib u soo celinta xiriirada qoysaska. Laanqayrta Cas ee Finland xittaa waxay ka faa'iidayataa nidaamyadan. Waa suuraggal, in dadka macluumaadka jabsaday ay arkeen ama kaydsadeen macluumaadkaada shakhsiga ah.

Jabsashada macluumaadka waxaa la ogaaday 18:ka Janaayo waxayna quseysaa oo kaliya kaydka macluumaadka ee la xiriira soo celinta xiriirka qoysaska. Jabsashada macluumaadka waxaa loo isticmaalay habab aad u horumarsan.

### **Sidee ayeey arrintan kuu saamaynaysaa?**

Weli ma ogin, cidda jabsashada macluumaadka samaysay ama sababta macluumaadka loo jabsaday. Guddiga caalamiga ah ee Laanqayrta Cas ayaa hadda saraakiil ka salgaaraya arrimaha u saartay iyagoo kaashanaya saraakiil dawlada ah.

Waxaan ognahay, in dadka macluumaadka jabsaday ay sameeyeen xiriir ay ku galaan qalabyada kambuyuurada iyo nidaamyada, kuwaas oo ay sidoo kale lagu kaydiyay macluumaadyadaada shakhsiga ah. Macluumaadyadan waxay noqon karaan tusaale ahaan magacaada, macluumaadkaada xiriirka, warbixinta ku saabsan dhacdooyinka sababay in qofka la waayo iyo macluumaadyada lagu kaydiyay kaydka macluumaadka ee ku saabsan dadka aad raadinayso.

Wakhtigan hadda la joogo lama arkin calaamado ah, in macluumaadyada kaydka la daabacay ama si khalad ah loo isticmaalay. Sida ay sheegeyso wararka hadda la hayo, macluumaadyada lama beddelin lamana saarin. Si kastaba ha ahaatee waxaa suuraggal ah, in qolada macluumaadka jabsatay ay iskudayaan in ujeedooyin khaldan ay macluumaadka u isticmaalaan.

Jabsashada macluumaadku ma quseyso hawlaha kale ee gargaarka ee Laanqayrta Cas ee Finland.

## **Maxay Laanqayrta hadda samaynaysaa?**

Guddiga caalamiga ah ee Laanqayrta Cas wuxuu joojiyay jabsashada macluumaadka wuxuuna jaray dhammaan xiriiradi bannaanka ee qalabkooda kambuyuurada. Laanqayrta Cas ee Finland waxay wakiilka ilaalinta macluumaadka ku wargelisay xadgudubka ilaalinta xogta .

Sida ugu dhakhsaha badan ayaan u billaabaynaa shaqada soo celinta xiriirka qoysaska, marka aan xaqiijin karno ammaanka shaqada.

## **Waa maxay arrinta muhiimka ah ee ay tahay in aad u fiirsato?**

Xaaladdu hadda adiga kaagama baahna in aad wax ka qabato.

Si kastaba ha ahaatee, waa suuraggal in qolada macluumaadka jabsatay ay iskudaydo, in macluumaadyada ay heleen ay si khaldan u isticmaalaan. Sidaas darteed waxaa muhiim ah, in aad si taxaddar leh uga fiirsato farrimaha qoraalka ah, iimayllada, telefoonnada ama farriimaha kale ee aad u aragto in ay shaki leeyihiin.

- Haka jawaabin farriimaha shakiga laga qaadi karo hana furin lifaaqyada macluumaadyada ama linkigiyada internetka ee farriimahaas ku jira.
- La xiriir booliska, haddii aad ka shakiso in lagu qiyaanay ama la iskudayay in lagu baado.
- Ogsoonow, in adeegyada soo celinta xiriirka qoysaska ee Laanqayrta Cas ay markasta lacag la'aan yihiin. Lacag lagama dalbado adeegyadaas.

## **Wax su'aal ah ma qabtaa?**

Waa iska caadi, in marka lagu jiro xaaladaha noocan ah aad dareemi karto tusaale ahaan welwel ah hubinti la'aan. Muhiimad aad u weyn ayeey noo leedahay kalsoonida macluumaadkaada shakhsiga ah iyo ilaalintooda.

- Haddii aad doonayso in aad wax ka weydiiso jabsashada macluumaadka, la xiriir adeegyadeenna dib u midaynta qoyska: [tracing@redcross.fi](mailto:tracing@redcross.fi) ama 040 721 5577 (lacagta telefoonka gacanta). Xog-raadinta waxaa ka jawaabaynaa maalmaha shaqada saacadda u dhexeysa 9–11 iyo 12–15. Lambarka looma soo diri karo farriimo qoraal ah
- Macluumaadyada hadda jira ee xaaladda ku saabsan waxaad sidoo kale ka heleysaa bogagga shabakadda guddiga caalamiga ah ee Laanqayrta Cas.

Salaan saaxiitinimo,

## **Marja Lehtimäki**

Maamulaha ururka  
Laanqayrta Cas ee Finland